



COMMUNITY HEALTH PLAN
of Washington™

The power of community

Hagaha Fudud ee Caymiska Caafimaadka

Sidee caymiska caafimaadku u shaqeeyaa?

Caymiska caafimaadku waa qorshe (sidoo kale loo yaqaano "xeerka") ee caawisa bixinta booqashooyinkaaga dhakhtarada, biilasha cusbitaalka, iyo daawaynta. Gudaha Gobolka Washington waxaa jira barnaamijka caymiska caafimaadka bilaashka ah ama kharashkiisu hooseeyo ee loogu yeedho Apple Health, sidoo kale loo yaqaano Medicaid, dadka hela wax ka yar heerka dakhli gaar ah.

Haddii aad ku jirto Apple Health, caadi ahaan waa inaanad bixin adeegyada caafimaadka. War wanaagsan! Wuxaad u tagi kartaa dhakhtar oo waxaad ku dhammayn kartaa dhibaatooyin kasta oo caafimaadka werwer la'aan ku sabasan inta kharashkeedu noqon doono.

CHPW Apple Health, waxaad ka doorataa liiska dhakhtarada, rugaha, cusbitaalada, iyo farmasiiyada si aad u hesho daryeelkaaga.



Maxay Apple Health (Medicaid) dabooshaa?

Qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee caymiska ay bixiso Apple Health:



Booqashooyinka dhakhtarla



Adeegyada cusbitaalka



Daryeelka gurmadka ah



Adeegyada caafimaadka maskaxda



Dawo qorida



Daryeelka hooyada iyo dhalaanka cusub



Daryeelka ka hortagga ah, sida baadhitaanka sanadlaha ah, tallaalada, iyo raajada naaska



Qaar ka mid ah adeegyada ilkaha iyo araga

Ma jiraan dheefo kale oo la heli karo?

Haa! CHPW waxay bixisaa dheefo bilaash ah iyo adeegyo dheeraad ah oo lagu kaabayo adeegyad aasaasiga ah ee Apple Health. Dheefahan dheeraadka ah waxaa ka mid ah:



Kaadhadhka hadiyada oo loogu talagalay baadhitaanada caafimaadka qaarkood



Muraayadaha indhaha dadka waaweyn oo bilaash ah



Wadar 20 booqasho oo bilaasha ah oo lagu tagayo akubanjarka, daawaynta jidhka, iyo duugida jidhka.

Wax badan ka eeg bogga
chpw.org/so/benefitsplus